

OGEYSIIS KU SAABSAN XANNIBAADDHA DUFANKA EE BULLAACADA

Xarunta Howlgalka Dayactirka Bullaacadaha ee Magaalada Columbus (SMOC) ayaa dhawaan ka jawaabtay wicitaano adeeg oo laga helay xaafaddaada kuwaas oo sheegayay in bullaacadaha ay dib ugu soo noqdeen. Baaritaan kadib, waxaa la ogaaday in xannibaaddha ay sababtay dufan ku ururtay tuubooyinka bullaacada.

Dufanka ayaa ah sababta ugu weyn ee xannibaadaha qaaliga ah, kuwaas oo saameeya tuubooyinka bullaacadaha ee magaalada iyo kuwa gaarka loo leeyahay, taasoo keenta in biyo dib ugu soo noqdaan guryaha iyo in qashin uu ku daato wadooyinka biyaha deegaanka. Dayactirka dheeraadka ah wuxuu kordhin karaa qiimaha adeega bullaacadaha, taasoo saameyn karta sicirka kirada guryaha. In dufanka lagu shubo nidaamka bullaacadaha ee magaalada waa mamnuuc sida ku cad xeerka magaalada Columbus. Ganaaxyo iyo tallaabo sharchiyeed ayaa lagu qaadi karaa cid kasta oo si cad u jabissa sharcigan.

Si looga hortago xannibaadaha dufanka ee mustaqbalka, fadlan raac talooyinkan:

- **Ha ku shubin dufan biyo-mareennada, xitaa haddii aad haysato qalab burburiya qashinka. Halkii aad taas ka samayn lahayd, ku shub dufanka weel si wanaagsan u xiran, sida qasacadda kafeega, kadibna ku rid qashinka.**
- **Cuntooyinka dufanka leh ka xoq saxamada kuna tuur qashinka ka hor inta aanad dhaqin.**

Wixii faahfaahin dheeraad ah booqo columbus.gov/KitchenGrease

Su'aalo ku saabsan Barnaamijka Dufanka, Saliidda iyo Xaydha (FOG), fadlan wac 614-645-5876 ama booqo: columbus.gov/FOG.

Si aad uga warbixiso biyaha qashinka ee dib u soo noqda ama daata, wac khadka degdega ah ee 24-ka saac ah: 614-645-7102.